

# wararkii u dambeeyay ee ka soo cusboonaaday saraha dheer

Luulyo 2024



Homes Victoria waxay aqoonsan tahay Mas'uuliyiinta Dhaqanka ee dhulka lagu dhisayo guryahan.  
Waxaan xushmad u heynaa odayaashoodii hore, kuwa jooga iyo kuwa imaan doona.

## Ku soo dhawoow gurigaaga Rose!

Rose iyo qoyskeedu aad bay ugu faraxsan yihiin inay ku soo noqdaan Flemington.

Rose waxay ka mid ahayd dhawr qof oo kiro ku deganaa oo ka guuray guryihii hore ee Victoria Street taas oo qayb ka ah dib u dhiska goobta si loo dhiso 359 guri oo casri ah, la heli karo isla markaasna korontada dhaqaaleynaya oo guryo bulsho/dowlad oo la awoodi karo ah.

Rose iyo qoyskeedu aad bay ugu faraxsan yihiin inay dib usoo noqdaan kuna dhex noolaadaan bulshada Flemington.

Wax badan ka ogow sheekada Rose adiga oo iskaan gareynaya QR koodhka hoose ee boggan.

// Waan ku faraxsanahay inaan soo laabto. Meeshani waa gurigayga, ma jirto meel la mid ah Flemington.




[www.homes.vic.gov.au/roses-story](http://www.homes.vic.gov.au/roses-story)



## Dhisidda guryo ka tiro badan kana wanaagsan kuwii hore

**Waxaa sii socda da'daaladii aan howlgabka uga dhigaynay isla markaasna aan ku dayactirayno saraha dhagaxyada cas ka sameysan ee Carlton.**

Waxaan la shaqaynaynaa kiraystayaasha, daneeyayaasha iyo bulshada deegaanka Carlton si ay gacan uga geystaan qaabaynta qorshayaasha dhismayaasha cusub, goobaha bulshada iyo guryaha cusub. Waxaan ku faraxsanahay inaan ku beddelno 196 guri oo qadiimi ah 231 guri oo guryo cusub isla markaasna casri ah oo korontada dhaqaaleynaya.



Saraha dhagaxyada cas ka sameysan ee Carlton waxaa lagu badali doonaa guryo intii hore ka badan kana wanaagsan.



## Halkan ka eeg guryaha bulshada ee ugu cusub Melbourne



Victoria Street, Flemington



Oakover Road, Preston



Bangs Street, Prahran

Heyso tan si ay kaaga caawiso  
inaad la socoto wixii kusoo  
cusboonaaday saraha dheer

# Sida ay u shaqeynayso dib-u-dayactirka

1



## La hadalka iyo dhegeysiga kiraystayaasha

Inta uu socdo mashruuca oo dhan, kiraystayaasha iyo bulshada ayaa xiriir lala sii sameyn doonaa inta goobo kale oo dheeraad ah loo qorsheeynayo in dib loo cusboonaysiiyo. Ka-qaybgalka waxa hagi doona qiyamka iyo mabaadi'da aanu isla qaabaynay inagoo kaashaneyna kiraystayaasha saraha dhaadheer.

2



## Rarista kireysteyaasha

Kooxdayada dib-u-dejinta goobta waxay si dhow ula shaqeeyaan kiraystayaasha iyo adeegyada bulshada si ay u helaan guriga ku haboon iyadoo loo eegayo baahiyahaaga iyo waxa aad doorbidayso. Kireyste kastaa wuxuu markaas helayaa laba dalab oo ku haboon iyo taageero joogto ah inta laga rarayo iyo inta ay kala qabsanayaan gurigooda cusub.


3



## Qorsheynta

La shaqaynta qotada dheer ee kiraystayaasha hadda iyo bulshada waxay xaqiijinaysaa in aragtida la wadaago ay hagto naqshadaynta guryaha cusub iyo xaafadaha dib loo soo cusboonaysiiyay.

4



## Dumin taxadar leh

Dhisme kasta si taxadar leh ayaa loo dumin doonaa. Iyadoo ay ku xiran tahay dhismaha tani waxay qaadan kartaa ilaa laba sano. Markasta bulshada waan la socodsiin doonaa wixii soo kordha inta howsha iyo dib u warshadaynta agabka ay socoto ilaa intii suurtagal ah.

5



## Diyaarinta goobta iyo dhismaha

Marka qorshaynta iyo naqshadaynta la ogolaado oo la magacaabo shirkada wax dhiseysa, Dhisida lagu dhisayo guryo cusub ayaa bilaabaneysa. Tani waxay qaadan kartaa laba ilaa saddex sano. Bulshada waa lala socodsiinayaa waxaana lagu martiqaadi doonaa inay ka qaybqaataan xafadaha soo socda.

6



## Soo dhawaada dhamaan kiraystayaasha cusub iyo kuwa soo laabanayaba!

Marka guryaynta cusub ee bulshada la dhamaystiro, dadkii hore u deganaa ee loo raray guryo kale waxay yeelan doonaan xuquuq soo noqosho oo ku salaysan xaq-u-yeelashadooda iyo baahidooda joogtada ah. Kiraystayaasha cusub sidoo kale waxaa la siin doonaa guryo.

Isdiwaangeli si aad  
ula socoto wixii soo  
cusboonaado



[www.homes.vic.gov.au/sign-up-project-updates](http://www.homes.vic.gov.au/sign-up-project-updates)

Follow garee Homes Victoria

Facebook: [@homesvicgov](https://www.facebook.com/homesvicgov)  
Instagram: [@homesvic](https://www.instagram.com/homesvic)  
Linkedin: [@homes-victoria](https://www.linkedin.com/company/homes-victoria)

## Bulshadeena, Qiyamkayaga

Bulshadeena: Qiyamkayaga waa tiro qiyam ah oo matasha sida aan markasta ugu dadaaleyno kiraystayaasha taas ayaana hagi doonta sida aanu ula xidhiidhno oo aanu ula shaqayno kiraystayaasha inta lagu jiro dib u dhiska guryaha dhaadheer ee Melbourne.

Wixii ka dambeeyay bishii Disembar, waxaanu la tashanay in ka badan 700 oo kirayste ah si aanu u ogaano waxa iyaga muhiimada u leh iyo waxa ay rabaan inay arkaan. Kireystayaashu waxay nala wadaageen ra'yigooda ku aadan qiyam kasta iyo fikrado badan sida in si joogto ah loola soo socodsiiyo wixii soo kordha, kooxaha WhatsApp, kooxaha codadka kiraystaha, barnaamijyada isku xirka bulshada, taageerada dib u dejinta kireystayaasha iyo in si cad loo sheego jadwalka dib-u-dhiska.

Waxaan hadda soo gabagabeyneynaa warbixin qeexaysa ra'yiga nalala soo wadaagay iyo sida ay u qaabeysay qiyamka, taas oo aan daabici doono dabayaaqada bisha Luulyo.

### Waa maxay qiyamka iyo mabaadi'da bulshada?

Iyadoo aan ku saleynayno ra'yigii koow nalala soo wadaagay, waxaan diyaarinay qoraal qabyo ah oo aan ugu magac darnay Bulshooyinkayada: Qiimahayada. **Bulshadeena, Qiyamkayaga.** Qiyamka iyo mabaadi'da bulshadeena waxay noqon doonaan dadaalada aan u dadaaleyno kiraystayaasha taas ayaana hagi doonta sida aan ula shaqayno iyaga markaan dib u horumarinayno saraha dhaadheer ee Melbourne.



## Waqti dheeraad ah oo aad ku qorshayn karto isbedelada kiradaada

Hadda waxaad haysataa ilaa bisha Noofambar 2024 si aad ula qabsato isbeddellada kiradaada.

Si aad nooga caawiso in kiradaadu sax tahay oo aan u hubino inaad bixiso inta lagaaga baahan yahay oo kaliya, fadlan noo soo sheeg wixii isbedel ah ee ku yimaada dakhliga qoyskaaga ama duruufaha wakhtigan ka hor.

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid ama aad u baahan tahay gargaar, fadlan nala soo xiriir adoo soo booqanaya: [www.housing.vic.gov.au/contact-housingvic](http://www.housing.vic.gov.au/contact-housingvic)

Kireeyste kasta waa lagu soo dhawaynayaa inuu codsado qiimo-dhimis (rebate) si ay u bixiyaan wax aan ka badnayn boqolkiiba 25 dakhligooda kirada

Doolar kasta oo ka soo baxa dadka bixiya kirada suuqa wuxuu dib ugu noqonayaa sidii guryaha dowlada loogu wanaajin lahaa. Lacagaha kirada waxaa lagu maareeyaa waxyaabo ay ka mid yihiin dayactirka dhismayaasha iyo adeegyada kiraystayaasha, sida nadiifinta iyo bixinta adeegyada kale ee guriyeynta ee muhiimka ah dhammaan guryaha dadweynaha oo ay ku jiraan guryaha dhaadheer.

Ma jiro kirayste kujira guri dawladeed oo bixiya wax ka badan boqolkiiba 25 dakhliga soo gala. Tani aad bay uga duwan tahay kirada suuqa ee guryaha gaarka loo leeyahay ee aan heysan balanqaadkan.

## Howlaha Dayactirka

Homes Victoria waxaa ka go'an dayactirka joogtada ah ee saraha dhaadheer inta ay kireystayaasha ku nool yihiin halkaas.

Waxaan sii joogteyn doonaa howlaha dayactirka iyo hagaajinta si aan guryaha dhaadheer uga dhigno kuwo raaxo leh oo lagu noolaan karo iyadoo la hubinayo in waxyaabaha sida wiishashka, tuubooyinka iyo adeegyada korontadu ay sii shaqeyaan.

Annaga oo ka jawaabayna ra'yiga kiraystaha, waxaan goobaha saraha dhaadheer ee Waqooyiga (North) Melbourne, Flemington, North Richmond, Carlton iyo Collingwood ka hirgelinay Kooxaha Dayactirka Maxaliga ah si aan u wanaajino bixinta adeegga dayactirka aan degdegga ahayn. Barnaamijku waxa uu u horseedaya natiijooyin fiican kiraystayaasha iyaga oo boqolkiiba 95 ku qanacsan adeegga.

Kumanaan kirayste ah ayaa sidoo kale ka faa'iidaystay barnaamijka lagu dayactirayo dabaqyada dhaadheer oo lagu casriyeyay jikooyinka iyo musqulaha, laguna rakibay daaqaadaha labada muraayad leh, iyo dib-u-habaynta guryaha dabaqyada ah iyo qolalka bulshada.



Haddii gurigaagu u baahan yahay hagaajin ama dayactir, waxaad ula xiriiri kartaa Xafiiska Guriyeynta saddex siyaabood:



Wici kartaa **13 11 72**

limaylka [tenant.maintenance@dffh.vic.gov.au](mailto:tenant.maintenance@dffh.vic.gov.au)

Online-ka [www.maintenance.forms.homes.vic.gov.au](http://www.maintenance.forms.homes.vic.gov.au)

# Wararkii u dambeeyay ee raritaanka

## Flemington iyo North Melbourne

Biliihii la soo dhaafay, kiraystayaal kasoo guuray saraha dhaadheer ee Waqooyiga Melbourne iyo Flemington ayaa usoo guuray guryaha bulshada/dowlada ee dhawaan laga dhisay Victoria Street, Flemington. Tan waxa ku jira kiraystayaal soo noqday oo hore loo raray iyada oo qayb ka ah mashruuca Victoria Street. Guryahan waxaa si degdeg ah ugu guuray kireystayaasha iyagoona ku raaxeysanaya guryahooda cusub ee leh goobo wanaagsan oo lagu baashaali karo iyo meelo gaar loo leeyahay.

Kiraystayaasha waxaa dhawaan laga siin doonaa guryo cusub oo laga dhisayo Abbotsford Street, North Melbourne. Kani waa dhismihii labaad ee cusub ee ugu horeeyay ee xaafada kuwaas oo diyaar u ah inaad u tixgeliso inay kuu noqdaan guriga cusub. Fadlan ogeysii sarkaalkaaga dib udejinta haddii aad daneynayso guryaha cusub ee Abbotsford Street, North Melbourne. Hadda waa waqtigii aad muujin lahayd damacaaga aad rabi laheed inaad ku booqato goobta aadna usoo aragto guryaha cusub ee xaafadaada.

Haddii aad u guurayso guri cusub dhawaan oo aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan nidaamka, fadlan la xiriiir sarkaalkaaga dib u dejinta. Haddii aadan hubin cidda ah sarkaalkaaga dib udejinta, ama aadan haysan meesha lagala xiriiri karo, fadlan iimayl u dir [relocationsteam@homes.vic.gov.au](mailto:relocationsteam@homes.vic.gov.au) ama la xidhiidh xafiiska guryaynta deegaankaaga si lagu caawiyo.

Dhammaan qoysaska ku nool meelaha kale ee saraha dhaadheer ee aan u baahnayn inay hadda guuraan, waxaan sii wadeyaa inaan la xiriirno si aan u siino macluumaad iyo talo, si aad u dareento inaad xog lugu filan heysato laguna caawinayo marka la gaaro waqtiga guuritaanka.

## Macluumaad intaas ka badan

Booqo: [homes.vic.gov.au/high-rise-victoria](https://homes.vic.gov.au/high-rise-victoria)

Iimayl: [enquiries@homes.vic.gov.au](mailto:enquiries@homes.vic.gov.au)

Ka wac Xarunta Wicista Guriyeynta [13 11 72](tel:131172)

## Follow gareey Homes Victoria

Facebook: [@homesvicgov](https://www.facebook.com/homesvicgov)

Instagram: [@homesvic](https://www.instagram.com/homesvic)

LinkedIn: [@homes-victoria](https://www.linkedin.com/company/homes-victoria)

## Fasiraadaha

